



Qaxootiga dhawaan yimid – waxa aad u baahan tahay inaad ogaato aadna sameynayso

Waxaan bixinaa lacag iyo adeegyo kaa caawinaya inaad la qabsato nolosha Australia. Si ay lacagta aad helayso kuugu sii socoto, waa inaad samaysaa waxyaabo gaar ah, waxaanu ugu yeedhnaa waxyaabahaas mutual obligation requirements (shuruudaha waajibaadka labada dhinac).

Xog muhiim ah

Waxaa loo baahan yahay inaad noosoo sheegto wixii isbeddel ah ee ku yimaadda xaaladahaaga maadaama ay saamayn ku yeelan karto lacagta aad qaadato.

Inta lagu guda jiro 12-ka isbuuc ee ugu horreeya laga bilaabo taariikhda aad timid Australia, mutual obligation requirements (shuruudaha waajibaadka labada dhinac) ka adiga wax lagaaga baahan yahay maaha si lagu caawiyo intaad kala qabsaneyso dalka.

12 usbuuc ka dib, waan kula kulmi doonaa oo inta badan, waxaan samayn doonaa Job Plan (Qorshe Shaqo). Job Plan kaas (Qorshahaas Shaqo) waxa uu yeelan doonaa hawlo ay tahay in aad sameyso si aad u hesho lacagtaada. Hawlahani waxay kaa caawinayaan inaad la qabsato nolosha Australia. Waa inaad tagtaa ballantan, ka bacdina waxaad u baahan doontaa inaad si joogto ah warbixin u siiso Centrelink. Haddii aadan saas sameyn, waxaa laga yaabaa in lacagtaadu joogsato.

Inta badan, kuuma gudbin doono adeeg bixiyaha shaqada mana u baahan doontid inaad shaqo raadsato ilaa aad Australia joogto 12 bilood.

Dadka qaarkood waxaa lagu xiraa hey'adaha shaqooyinka ee qofka caawiya 12-ka isbuuc ee aanan waxba looga baahneyn markay dhamaato. Haddii ay taasi dhacdo, waa inaad tagtaa ballamaha oo aad kala xajooto hey'ada shaqada Job Plan (Qorshe Shaqo) haddii kale waxaa laga yaabaa in lacagtaadu joogsato.

Waxaad codsan kartaa in lagu gudbiyo hey'ada bixiso adeegyada shaqada laga bilaabo 6 toddobaad ka dib markaad timaadid Australia haddii aad rabto in lagaa caawiyo sidii aad shaqo ugu heli lahayd si degdeg ah.

Markaad timaado

Shaqaalaha kiiskaaga ayaa noo sheegi doona goorta aad timid Australia. Waxay ku ogeysiin doonaan ballantaada cusub ee aad codsiga ku gudbinayso.

Ballantani waxaa lagu qaban doonaa 3 maalmood oo maalmaha shaqada ah gudahood markaad timaaddo Australia ama markaad gaadho meeshaad ka degi lahayd Australia. Ballantani badanaa waxay ahaan doontaa mid telefoon ah. Waa inaad tagtaa ballantan.

Ballantan, shaqaalaheennu waxay kaa caawin doonaan inaad dalbato lacag-bixinta ku haboon xaaladdaada.

Haddii aadan haysan qof ku caawiya, wac **131 202** si aad noogula hadasho luqadaada. Anaga ayaa kuu sameyn doono ballanta.

Waxaan kuu samayn doonaa balamo kale. Waa muhiim inaad tagto dhammaan ballamahaaga, haddii kale waxaa laga yaabaa in lacagtaadu joogsato.

Waxaan kugu martiqaadi doonaa siminaar si aad wax uga barato lacagahayaga iyo adeegyadayada. Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad tagto siminaarka sababtoo ah waxaad ka

baran doontaa macluumaad muhiim ah oo ku saabsan lacagta aad qaadato. Adiga ayaa go'aansan kara haddii aad rabto inaad tagto.

Noosoo sheeg wixii isbedel ah ee kugu yimaada

Inta aad lacag naga qaadanayso, waxaad u baahan tahay inaad noosoo sheegto haddii duruufahaagu isbeddelaan maadaama laga yaabo inay saameeyso lacagta aad qaadato. Waa inaad taas samaysaa 14 maalmood gudahood laga bilaabo isbedel kasta oo dhaca. Nala soo socodsii haddii aad:

- bedesho meelaha lagaala soo xiriiri karo
- badesho address kaaga
- kala tagtaan lamaanahaaga ama aad leedahay lamaane cusub
- bilowdo ama joojiso daryeel ilmo, oo ay ku jirto ilmo kuu dhalanaya
- sameeyso shaqo kasta oo aad lacag ku qaadatay
- xanuunsan tahay, dhaawacantay ama aad naafo tahay.

Waxaan kuu soo diri doonaa warqad haddii aan xog dheeraad ah kaaga baahanahay. Waxaan warqadda u soo diri doonaa address kaaga ama akoonkaaga myGov. Waxaad haysataa 14 maalmood oo aad noogu soo gudbin karto macluumaadka ama waxaa laga yaabaa in lacagtaadu joogsato. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo inaad fahanto warqadda, waxaad naga soo wici kartaa **131 202**.

Isbuuca 12-naad

Waanu kula kulmi doonaa markaad Australia joogto 12 isbuuc ka dib. Ballantan waxaanu:

- hubin doonaa waxkasta si loo xaqiijiyo in xaaladaadu aanay isbedelin
- kula samayn doonaa Job Plan (haddii loo baahdo)
- kuu sheegi doonaa waxa ku saabsan mutual obligation requirements (shuruudaha waajibaadka labada dhinac)
- kuu sheegi doonaa waxa ku saabsan shuruudaha warbixintaada iyo sida loo soo sheego
- kuu gudbin doonaa hey'ad bixisa adeeg shaqo, haddii aad rabto in lagaa caawiyo sidii aad shaqo u heli lahayd 12 bilood ka hor
- kuu gudbin doonaa adeegyada shaqada ee khasabka ah (haddii ay habboon tahay).

Waa inaad tagtaa ballantan, haddii kale waxaa laga yaabaa in lacagtaadu joogsato.

Job Plan

Haddii aan lagu gudbin adeegyada shaqada ee khasabka ah, waxaanu kula samayn doonaa Job Plan (Qorshe Shaqo) oo socon doona 12 bilood laga bilaabo taariikhda aad timid Australia. Waa heshiis sheegaya waxqabadyada aad u baahan doonto inaad samayso si ay kaaga caawiyaan inaad la qabsato noloshaada Australia.

Waxaan kaala hadli doonaa waxqabadyada aad dooran karto. Waa inaad ogolaato inaad samayso ugu yaraan hal hawl.

Waxqabadyadaadu waxay noqon karaan:

- ka qaybqaadashada Humanitarian Settlement Program (Barnaamijka Dejinta Bani'aadamnimada)

- barashada Ingiriisiga iyada oo loo marayo Adult Migrant English Program (Barnaamijka Ingiriisiga Muhaajiriinta Waaweyn)
- Ka qaybqaadashada Workforce Australia
- samaynta shaqo kale oo la ansixiyay, waxbarasho ama waxqabadyo tababar, taas oo ku xidhan shuruudaha ka qaybgalka.

Waa inaad samaysaa waxqabadyada qeybta ka ah Job Plan kaaga si ay usii socoto lacagta aad hesho.

Haddii aanad samayn karin mid ka mid ah waxqabadyadaas, waa inaad xilli hore noo soo sheegtaa. Haddii aadan noo soo sheegin, waxaa laga yaabaa in lacagtaadu joogsato.

Maxaad u baahan tahay inaad sameyso usbuuca 12-naad ka dib

Si ay lacagtaada kuugu sii socoto, waa inaad:

- tagtid dhammaan ballamahaaga
- sameysaa waxqabadyada qeybta ah Job Plan kaaga
- nala soo socodsiisaa inaad sameynayso howlaha lagu diray
- noo soo sheegtaa haddii aad hesho lacag kaasoo gashay shaqo.

Si aad u hesho lacagtaada labadii toddobaadba mar, waa inaad samaysaa hawsha lagu heshiiyay oo aad tagtaa ballamahaaga. Haddii aadan tagi karin ballamaha Centrelink ama hay'adaha shaqada, waxaad u baahan tahay inaad anaga, ama hey'adaada shaqada, la socodsiisid isla markiiba.

Waan kuu sheegi doonaa inta jeer ee aad u baahan tahay inaad nala soo xiriirto. Warbixinta waxaad noo soo gudbin kartaa adiga oo naga soo waca **131 202**, ama aada xarunta adeega ama ado isticmaalaya akoonkaaga Centrelink ee ku xidhan myGov.

Employment Services Assessment (Qiimaynta Adeegyada Shaqada)

Haddii aad jirran tahay, ama aad dhaawacantay, ama aad leedahay naafonimo saamaynaysa shaqada aad qaban karto ama inta saacadood ee aad shaqayn karto waxaan kuu diyaarin karnaa Employment Services Assessment (Qiimaynta Adeegyada Shaqada).

Qiimayntani waxay naga caawinaysaa inaan fahanno inta saacadood ee aad shaqayn karto iyo nooca caawimada shaqaalaynta ee adiga kuu fiican.

Waxaad u baahan doontaa inaad na siiso caddayn caafimaad ka hor inta aanan kuu ballamin Employment Services Assessment (Qiimaynta Adeegyada Shaqada).

Nala soo socodsii haddii aadan tagi karin ballantaada. Waxaad naga soo wici kartaa **131 202**.

Markaad Australia joogtay 12 bilood

Ballan ayaad nala yeelan doontaa markaad Australia joogto 12 bilood haddii aadan horay u haysan adeegyada shaqada ee khasabka ah.

Ballantaas waxaanu ku hubin doonaa xaaladaada waxaanan kuu gudbin doonaa Workforce Australia. Waa inaad tagtaa ballantan, haddii kale waxaa laga yaabaa in lacagtaadu joogsato.

Ka qaybqaadashada Workforce Australia

Workforce Australia waa adeeg shaqo oo kaa caawin kara inaad u diyaargarowdo isla markaasna aad shaqo raadsato. Waxay leeyihiin adeeg online ah iyo shabakad adeeg bixiyeyaal ah oo kaa caawin kara:

- sidii aad u qoran laheed resumeygaaga
- inaad isu diyaariso waraysiyada shaqo
- sidii aad ku heli laheed xirfadaha ay u baahan yihiin meelaha loo shaqeeyo ee maxalliga ah
- sidii aad u raadin laheed aadna ugu fara adeygi laheed shaqada.

Waa inaad ka qaybgashaa Workforce Australia ka dib markaad Australia joogto 12 bilood. Si kastaba ha ahaatee, waxaad dooran kartaa inaad ka qayb qaadata Workforce Australia laga bilaabo 6 toddobaad ka dib markaad timaaddo Australia haddii aad rabto inaad si dhakhso ah shaqo u hesho.

Haddii aad u qalanto Inclusive Employment Australia (Shaqooyinka Loo Wada Dhanyahay ee Australia), Transition to Work (Inaad usii gudubto shaqo) ama the Remote Australia Employment Service (Adeega Shaqaaleysiinta ee Tuulooyinka Australia), waan ku gudbin doonaa 12 usbuuc ka dib markaad Australia joogto. Waa inaad samaysaa waxqabyada qeybta ka ah Job Plan kaaga ama waxaa laga yaabaa in lacagtaadu joogsato.

Waxaa laga yaabaa inaad jiraan qaar ka mid ah xubnaha qoyskaaga oo u qalmi doona barnaamijyadan. Waa inay sameeyaan waxqabadyada qeybta ka ah Job Plan waxayna ku xiran tahay xaaladdooda.

Rent Assistance (Kaalmada Kirada)

Marka aad bilowdo inaad kiro bixiso waxa laga yaabaa in aad hesho Rent Assistance (Kaalmada Kirada). Tani waa lacag-bixin dheeraad ah oo lagaaga caawinayo kharashaadka kiradaada. Looma baahna inaad foom soo buuxsato, anaga ayaa toos kuugu bilaabayna haddii aad xaq u leedahay.

Markaad noo sheegto address kaaga, waxaanu ku waydiin doonaa kirada aad bixiso inta . Waxaan tan u isticmaalnaa si aan u ogaano inta Rent Assistance (Kaalmada Kirada) ee aad heli karto.

Waxaa laga yaabaa inaan kaa codsano inaad nala wadaagto caddaynta inta ay tahay kirada aad bixiso. Waxaad noo keeni kartaa heshiis kiro ama waxaad buuxin kartaa Rent Certificate (Shahaadada Kirada) haddaan ku waydiino.

Wixii macluumaad intaas ka badan ah

- Wixii khuseeya lacagaha iyo adeegyada Centrelink, wac **131 202** si aad noogula hadasho luqadaada. Waxaa loo baahan doonaa Customer Reference Number (CRN) Lambarka Tixraaca Macmiilka markaad na soo wacdo. Haddii aadan galin ama aadan aqoon CRN kaaga, waxaad maqli doontaa cod la duubay oo 3 jeer ku hadlaya luqada Ingiriiska. Marka saddexaad ka dib, codku wuxuu odhan doonaa 'What language please?' ('Fadlan luqaddee?'). Sheeg luqadaada waxaana lagugu xidhayaa qof ku hadla luqadaada.
- booqo **servicesaustralia.gov.au/yourlanguage** halkaas oo aad ka akhrisan karto, ama aad ka dhageysan karto ama aad ku daawan karto fiidiyowyo luqadaada ah
- wac **132 011** wixii ku saabsan Medicare ka iyo **131 272** wixii ku saabsan Child Support. Noo sheeg haddii aad u baahan tahay turjubaan, waana kuu diyaarin doonaa mid lacag la'aan ah
- Booqo xarunta adeega. Noo sheeg haddii aad u baahan tahay turjubaan, waana kuu diyaarin doonaa mid lacag la'aan ah.

Ogsoonow: marka aad kasoo wacayso taleefanka guriga lambarada ka bilaabanaya '13' meel kasta oo aad Australia ah qiimo go'an ayaad bixinaysaa. Qiimahaas go'an waa uu ka duwanaan karaa qiimaha taleefanada gudaha ee caadiga ah shirkaduhuna waa ay ku kala duwanaan karaan qiimahaas. Lambarada ka biloowdo '1800' marka laga soo wacayo taleefanka guriga waa lacag la'aan. Markaad wax ka wacayso taleefanada dadweynaha iyo moobaylada gacanta waxaa laga yaabaa in waqti go'an lagu qabto sidoo kalena qiimuhu uu aad u sarreeyo.

Cudur-daar

Macluumaadka ku qoran daabacaadan waxaa loogu talagalay oo kaliya inuu noqoto mid kuu sharaxaysa lacagaha la bixiyo iyo adeegyada. Adiga ayay masuuliyad kaa saaran tahay inaad go'aansato haddii aad u baahan tahay inaad codsato/xareysato lacag-bixin iyo inaad samayso arji ku saabsan xaaladahaaga gaarka ah.



Newly arrived refugees – what you need to know and do

We provide payments and services to help you settle into life in Australia. To keep getting your payment, you must do certain things, we call these mutual obligation requirements.

Important information

You need to tell us about any changes in your circumstances as they may affect your payment.

During the first 12 weeks from the date you arrive in Australia, you will be given an exemption from mutual obligation requirements to help you settle into the country.

After 12 weeks we will meet with you and, in most cases, make a Job Plan. This Job Plan will have activities that you must do to keep getting your payment. These activities help you settle into life in Australia. You must go to this appointment, and after that you will need to report to Centrelink regularly. If you don't, your payment may stop.

In most cases, we will not refer you to an employment services provider and you will not need to look for work until you have been in Australia for 12 months.

Some people are referred to a provider after the 12 week exemption. If that happens, you must attend appointments and negotiate a Job Plan with the provider or your payment may stop.

You can ask to be referred to an employment services provider from 6 weeks after you arrive in Australia if you want help to find work sooner.

When you arrive

Your case worker will tell us when you have arrived in Australia. They will let you know about your new claim appointment.

This appointment will be within 3 business days of you arriving in Australia or when you reach your final destination in Australia. This appointment will usually be by phone. You must go to this appointment.

At this appointment, our staff will help you claim the right payment for your situation.

If you do not have anyone to help you, call **131 202** to speak to us in your language. We will book the appointment for you.

We will make some other appointments for you. It is important that you go to all your appointments, or your payment may stop.

We will invite you to a seminar to learn about our payments and services. We encourage you to go to the seminar because you will learn important information about your payment. You can decide if you want to go.

Tell us about any changes

While you are getting a payment from us, you need to tell us if your circumstances change as it may affect your payment. You must do this within 14 days of any change. Let us know if you:

- change your personal or contact details
- change your address
- separate from your partner or have a new partner

- start or stop looking after a child, including having a baby
- do any paid work
- are sick, injured or have a disability.

We will send you a letter if we need information from you. We will send the letter to your address or your myGov account. You will have 14 days to give us the information or your payment may stop. If you need help understanding the letter, you can call us on **131 202**.

At 12 weeks

We will meet with you after you have been in Australia for 12 weeks. At this appointment we:

- check to make sure your circumstances have not changed
- make a Job Plan with you (if required)
- tell you about your mutual obligation requirements
- tell you about your reporting requirements and how to report
- can refer you to an employment services provider, if you want help to get work before 12 months
- refer you to compulsory employment services (if appropriate).

You must go to this appointment, or your payment may stop.

Job Plan

If you are not referred to compulsory employment services, we will make a Job Plan with you that is valid for 12 months from the date you arrived in Australia. It is an agreement that says what activities you will need to do to help you settle into your life in Australia.

We will talk to you about the activities you can choose. You must agree to do at least one activity.

Your activities can be:

- participating in the Humanitarian Settlement Program
- learning English through the Adult Migrant English Program
- participating in Workforce Australia
- doing other approved work, study or training activities, depending on your participation requirements.

You must do the activities in your Job Plan to keep getting your payment.

If you cannot do any of the activities, you must let us know beforehand. If you do not tell us, your payment may stop.

What you need to do after week 12

To keep getting your payment, you must:

- go to all your appointments
- do your Job Plan activities
- tell us you are doing your activities
- tell us if you are getting any employment income.

To keep getting your payment every fortnight, you must do the agreed activity and go to your appointments. If you cannot go to a Centrelink or provider appointment, you need to let us, or your provider, know immediately.

We will tell you how often you need to report. You can report by calling us on **131 202**, going to a service centre or using your Centrelink account linked to myGov.

Employment Services Assessment

If you are sick, injured, or have a disability that affects what work you can do or how many hours you can work we may arrange an Employment Services Assessment.

This assessment helps us understand how many hours you can work and what type of employment help is best for you.

You will need to give us medical evidence before we book an Employment Services Assessment for you.

Let us know if you cannot go to your appointment. You can call us on **131 202**.

When you have been in Australia for 12 months

You will have an appointment with us once you have been in Australia for 12 months if you are not already with compulsory employment services.

At this appointment we will check your circumstances and refer you to Workforce Australia. You must go to this appointment, or your payment may stop.

Participating in Workforce Australia

Workforce Australia is an employment service that can help you prepare and look for work. It has an online service and a network of providers to help you:

- write your resume
- get ready for interviews
- get skills that local employers need
- find and keep a job.

You have to participate in Workforce Australia after you have been in Australia for 12 months. However, you can choose to participate in Workforce Australia from 6 weeks after you arrive in Australia if you want to find work sooner.

If you qualify for Inclusive Employment Australia, Transition to Work or the Remote Australia Employment Service, we will refer you after 12 weeks in Australia. You will have to do the activities in your Job Plan or your payment may stop.

You may have some family members that will be eligible for these programs. They will have to do the activities in their Job Plan depending on their situation.

Rent Assistance

When you start paying rent you may be able to get Rent Assistance. This is an extra payment to help with your rent costs. You do not need to apply, we automatically pay you if you are eligible.

When you tell us your address, we will ask you how much rent you are paying. We use this to work out how much Rent Assistance you can get.

We may ask you to give us proof of how much rent you pay. You can give us a lease agreement or fill in a Rent Certificate if we ask you to.

For more information

- For Centrelink payments and services, call **131 202** to speak with us in your language. You need your Customer Reference Number (CRN) when you call us. If you don't enter or know your CRN, you will hear the recording speak 3 times in English. After the third time, the voice will say 'What language please?'. Say your language and you will be connected with someone who speaks your language.
- go to **servicesaustralia.gov.au/yourlanguage** where you can read, listen to or watch videos with information in your language
- call **132 011** for Medicare and **131 272** for Child Support. Let us know if you need an interpreter, and we will arrange one for free
- visit a service centre. Let us know if you need an interpreter and we will arrange one for free.

Note: calls from your home phone to '13' numbers from anywhere in Australia are charged at a fixed rate. That rate may vary from the price of a local call and may also vary between telephone service providers. Calls to '1800' numbers from your home phone are free. Calls from public and mobile phones may be timed and charged at a higher rate.

Disclaimer

The information contained in this publication is intended only as a guide to payments and services. It's your responsibility to decide if you wish to apply for a payment and to make an application with regard to your particular circumstances.